gillette CHILDREN'S

waxbarashada bukaanka

DIS050-SO

Bukaanku badanaa waxay u baahan yihiin daawa xanuunka jebisa maalmaha u horeeya ama todobaadyada u horeeya ee qaliinka ka dib. Muddada aad u baahantahay daawada dhererkeeda iyo daawada nooca aad u baahan tahay waxay ku xiran tahay qaliinka lagugu sameeyay nooca uu yahay iyo u dulqaadashadaada xanuunka. Tusaale, haddii uu ku hayo xanuun yar, waxaa laga yaabaa in ad u baahan tahay daawo oo ah xanuun jebiye fudud, sida acetaminophen (Tylenol©) ama, haddii uu qoray dhakhtar kaagu ibuprofen (Motrin© ama nooc kale). Bukaanada kale waxay u baahan yihiin daawooyin ka xoog badan oo dhakhtarka dalbay.

**Ku Feker sidii Xanuunka looga Hortegi lahaa**

Daawada xanuunku waxay sida ugu fiican u wax u tartaa marka lagu qaato wakhtigii loogu tala galay, badanaaba afartii ama shantii saacba mar. Haddii uu ku hayo xanuun badan , oo baahato in aad qaadato daawo maalintiiba shan goor ka badan, fadlan wac kalkaalisada caafimaadka ee rugtaada caafimaadka. Xanuunku waa kugu badan karaa inta aad hurdeysid, sidaa dartees intii aad sugi lahayd in aad iskaa hurdada uga soo kacdo, waxaan kugula talinaynaa in aad saacad ku kicisa buuxsato hadii aad u baahan tahay si aad u qaadato daawada. Si xanuunka loo xakumo waxaa ugu fiican in aad mar walba daawada ku hayso heerkii laga rabay. Haddii mar xanuunku uu noqdo mid aad u badan , waa adkaan kartaa si dib loogu xakameeyo.

**Safarka Guriga lagu Aadayo**

Qiyaastii saacad ka hor intaadan isbitaalka ka bixin, qaado kuuro/dose buuxa oo ah daawada xanuunka jebisa. Haddii aad safar dheer gelayso oo xanuun jebiye loo baahan yahay, u sii daawada sida loogu qoray intuu safarka ku jiro. Waxaa laga yaabaa in aad hadba istaagto si aad u bedelato dhinaca aad u taal. Bedelidda dhinaca uu qof u yaal waxay u fiican tahay wareegga dhiigga waana u raaxa roon tahay. Hubi in aad isticmaasho suunka kursiga! Bukaanadu way u nugul yihiin in ay ku dhaawacmaan shil baaruur qaliinka ka dib.

**Sidee Lagu Garan Karaa Haddii Daawa Xanuun Jebisa loo Baahan Yahay**

Waxyaalahan waa qaar ka mid ah waxyaalaha tilmaamaya in qof uu xanuun hayo.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890

- Oohin, cabaad, iyo/ama taah
- Xanuun ka cabasho
- Si sahal ah u caroonaya, quuqle ah, camal-xun ama akhlaaq xun
- Aan la dejin karin (la dejin karin)
- Hab-dhaqankii oo wax weyni iska bedelaan, (sida, qof aad u firfircoonaa oo iska amusan ama aan rabin in
- uu cid wax ku darsado)
- Aan seexan karin ama xasiloonyn, hurdo aan xiriir ahayn
- Isbedel weyn oo ku yimid cunta cunidda, aan cunitaan iyo cabitaan badan qaadanayn
- Aan xanuunka la ilawsiin karin
- Isbedello waxqabadka murqaha ku yimaada, badanaaba muruqa oo adkaada ama dubaaxiya
- Iyadoo uusan meelna ku ladi/nagana karin
- Aan dhaqdhaqaaq lahayn, iyada oo ay u egtahay in uu iska ilaalinaayo in la taabto ama la dhaqdhaqaajiyo
- jirka meeshii la qalay
- Aan rabin in uu ciyaaro ama aan ka qayb qaadanayn waxqabadkii caadiga u ahaa ama uu ka heli jiray
- Socda bogga xiga

**Waxyaabo Sababi Kara in Xanuunku Kordho**

- Barar
- Dhaqdhaqaaq keenay xanuun ama adkaansho
- Rafaad, cabsi ama welwel
- Infekshan
- Hurda xumo, daal aad u badan

**Waxa la Sameeyo Haddii uu Xanuun ku Hayo**

- Qaado kuuro/dose kale oo ah daawada xanuunka jebisa ah haddii wakhti ku filani ka soo wareegay illaa markii aad kii hore qaadatay.
- Haddii xanuunku ka daran yahay kii caadiga ahaa, fiiri haddii wax qalad oo dacay ay jiraan, adigoo isticmaalaya waxyaabaha sababi kara oo kor ku taxan.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890

- Haddii aadan haddaba isticmaalayn daawo xoogan, qaado daawo xoogan oo xanuunka jebisa, haddiidhaktarkaga ku dalbay, markaad qaadaneyso kuurada/dose-ka xigta. (Qaado daawada xanuunka eexooggan intaad siin lahayd dawooyin kale oo xanuun jebiya, ma aha in aad isugu darayso dawooyinka).
- Qaado daawada dhamaanteed, laakiin ha qaadan in ka badan intii laguu qoray.

**Isticmaal Habab Kale oo kugu Caawinaya in Xanuunka la Yareeyo**

- Isku mashquuli muusiko, sheekooyin, TV, cayaaraha fiidiyowga, iwm.
- Masaajee ama si dabacsan u taa-taabo meelaha aan ku xanuunayn ee jirka.
- Hadday suurta gal tahay, qaybta la qalay ee jirka ka sara mari wadnaha dhowr inch. Sidani waxay yaraynaysaa bararka waxayna wanaajinaysaa wareegga dhiigga.
- Baraf saar 15 daqiiqoba markiiba, adiga oo u dhexaysiinaya 30 daqiiqo mararka aad barafka saarayso. Maro u dhexaysii barafka iyo jirka si aan jirku aad ugu qaboobin. Hubi in uu qalalaado kabaygu.
- Isku dhiiri geli in aad is dejiso adiga oo neef si fiican u jiidaaya ama ku hogaami maska xda sawir wakhti hore oo aad u fiican oo aad soo martay. Isdejintu waxay murqaha ku caawin kartaa in ay debcaan waxayna keeni kartaa raaxaysi/xanuun ka nasasho.

**Bedelka iyo Furidda Kabayga**

- Qaado hal kuuro/dose oo dhan oo ah daawada xanuunka jebisa qiyaastii hal saac ka hor intaan kabayga la furin. Waxaa imanaaya waxxoogaa xanuun ah marka kabayga la furo. Maalinta kabayga la furaayo horay u soo qaado daawadaada xanuunka jebisa si aad u qaadato kuuro/dose kale oo daawo ah, haddii loo baahdo.
- Bararku waa sii jiri karaa muddo marka la furo kabayga ka dib. Wad in aad gacanta ama lugta kor u qaado marka kabayga lagaa furo ka dib.

**Sida aad Isaga Joojinayso Daawada Xanuunka Jebisa**

Markii aad noqdo mid u dulqaadan kara, badanaaba dhawr maalmood ka dib markii guriga lagu keeno qaliinka kadib, waxaad si tartiib ah uga bedelan kartaa daawo xanuunka jibisa oo aan awood badneyn. Hal jid/ qaab oo fiican oo sidaan loo samayn karo waa adigoo Tylenol kali ah ku bedela daawadii xooganayd ee xanuun jibiska ahayd ee aad qaadan jirtay. Waxaa ugu fiican oo sidaan la sameeyaa maalinnimadii.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890

Haddii xanuun kaaga la xakumo, waxaad wadi kartaa Tylenol. Haddii aad noqdo mid aan xanuunka u dulqaadan karin habeenkii, isticmaal daawadii xooganayd ee xanuun-jibiska sida dhakhtarka kugu tilmaamay. Qaliinka ka dib maalin walba waa in xanuunku soo yaraadaa adigoo ugu dambaystiina Tylenolka xattaa joojin kara

**Maalin Walba ka Soo Raynaya**

- Sii ogow isbedelada waaweyn ee la xiriira waxqabadka oo keeni kara xanuun uu sababay isticmaal badan. Inta aadan samayn jimicsiyada, istaag ama socod, saacad ka hor sii qaado daawada xanuunka jebisa. Waxaa wanaagsan in aad daawada xanuunka jebisa qaadato oo aadna isku dhiiri geliso waxqabad intii aad xadidi lahayd waxqabadkaada.
- Si tartiib ah maalin walba u kordhi waxqabadaaga. Haddii aadan xanuun badan dareemin oo aad aminkiiba waxqabad badan sameyso, waxay kuu keeni kartaa in xanuunku kugu kordho.
- Wad in aad sare u qaado lugaha ama gacmaha la qalay, maadaama wareegga dhiigga ee caadiga ahi uu muddo tabar daraanaayo.

**Wac Gillette Haddii:**

- Sabab aan la garanayn awgeed, xanuunku uu u noqdo mid daran ka dib markii uu muddo ahaa mid loo dulqaadan karo.
- Xanuunku kadaro meeshii qaliinkana lagu arko guduud, barar ama dhacaan adag oo cusub.
- Sabab la'aan xanuunki isu bedelo meel kale (sida, dhaqdhaqaaqyada ama jugo caadi ah/nabaro).
- Uu jiro xanuun meel kabaygu saaran yahay balse aan ahayn meeshii qaliinka. Mararka qaarkood kabaygu cadaadis ayuu saari karaa meelaha lafaha leh, sida lafaha canqawga, cirbaha ama daba-gibinta.
- Xanuunku uu noqdo mid daran oo aan lagula tacaali karin hababka aan halkaan ku soo sheegnay. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad qaadato labo iyo saddex kuuro/dose daawada xanuunka jebisa ah, oo afar saac isu jira/loo dhexeysiinayo, si xanuunka looga adkaato/xakameeyo. Waxaa ugu fiican in aad iskudhafto hababka kale ee xanuun jebiska, kor ku taxan, si xanuunka loo xakumo ka dib markii uu xanuunkunoqday mid daran. Laakiin hal daawo oo xanuunka jebisa ha ka qaadan hal kuuro/dose ka badan hal waqti.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.
If you are a Gillette patient with urgent questions or concerns, please contact Telehealth Nursing at 651-229-3890

**Digniin ku Aadan Daawada Xanuunka Jebisa**

Acetaminophen waxay ku jirtaa daawooyin fara badan oo la gadan karo iyadoo dhakhtar aanu qorin. Mar walba akhri warqadda la socota daawooyinka si aad uga hortagto in aad isla hal daawo wax badan ka qaadato. Yarey Acetaminophen haa qaadan wax ka badan 5 kuuro/dose 24kii saacba. Ha qadaan ibuprofen qaliinka ka dib illaa in dhakhtarkaagu ogolaado maahee.